Qiimeynta Gobolka oo dhan: Maxay Qoysasku Ugu Baahan Yihiin Inay Ka Ogaadaan Isticmaalka Natiijooyinka MCA iyo MTAS

Guga kasta ardayda Minnesota ee dhigata fasalada 3-12 waxay qaataa qiimeynta soo socota si ay u buuxiyaan shuruudaha federaalka iyo gobolka:

- MCA (Qiimaynta Buuxda ee Minnesota)
- MTAS (Imtixaanka Minnesota ee Xirfadaha Tacliinta)

Ardayda badankood waxay qaataan MCA, laakiin ardayda qaata adeegyada waxbarashada gaarka ah ee buuxiya shuruudaha u-qalmitaanka waxay qaataan MTAS bedelkeeda. Labaduba waxay bixiyaan macluumaad kusaabsan barashada ardayga ee heerka fasalka ee aqrinta, xisaabta iyo / ama sayniska.

Hubinta in arday kastaa helo adeegyada mawduucyada adag iyo waxbariddu waa mudnaanta ballanqaadka Minnesota ee ah inay siiso ilmo kasta waxbarasho tayo sare leh, iyadoo aan loo eegin jinsiyadooda ama nambarka ZIP-ka

The Warbixinta Ardayga Shakhsiyeed (ISR) waxay siisaa arday kasta natiijooyinka MCA ama MTAS laga bilaabo guga 2021 si looga caawiyo qoysaska inay ku lug yeeshaan uguna doodaan guusha ilmahooda ee iskuulka.

Natiijooyinka waxay matalayaan ***sawir qaadis*** ee barashada ardayga xisaabta, aqrinta, iyo / ama sayniska, iyadoo lagu saleynayo waxa laga filayo ardayda oo dhan inay kubartaan isugeyn dhamaadka darajo.



- Heerarka Aqoonta ee K-12 ee Minnesota waxay qeexayaan aqoonta iyo xirfadaha dhammaan ardayda laga filayo inay ku bartaan aag kasta oo maaddo ah. Iskuulada degmooyinka ayaa looga baahan yahay inay dhigaan heerar si ardayda oo dhami ay u helaan marin tayo sare leh iyo waxbarid.
- Haddii ardaygaagu haysto heerka waxqabadka ee Buuxiyo ama *Dhaafay Heerarka* waxaa loo tixgeliyaa inay aqoon u leeyihiin tacliinta iyo xirfadaha darajadooda.

Natiijooyinka waa ***hal cabir*** ee barashada ardayga Waxaad u adeegsan kartaa natiijooyinka in aad ku bogatid meesha ardaygaagu si fiican ugu guulaystay iyo halka laga yaabo inuu ugu baahdo taageero dheeraad ah Tallaabooyin dheeri ah waa in loo adeegsadaa sawirka dhameystiran.

- Heerka waxqabadka (Ma Buuxin, Buuxiyo, Qeyb ahaan Buuxiyo, ama Ka Badan) wuxuu muujin karaa horumarka maado waqti ka dib, laakiin dhibcaha MCA / MTAS waa in aan la isbarbar dhigin sanadaha oo dhan maadaama halbeega la isbarbar dhigi karin.
- Iskuulada waxay u isticmaali karaan natiijooyinka go'aannada hagista ee ku saabsan taageerada kooxaha ardayda iyo inay horumariyaan qalabka wax lagu baro, laakiin ma aha qodobka keliya ee shakhsiyaadka go'aannada u qaata sida u dallacaadda fasalka ku xiga iyo meelaynta koorsada sare/ hagaajinta.
- Ardayda dugsiga sare waxay u isticmaali karaan natiijooyinka meelaynta koorsada Minnesota State nidaamka kuliyadaha iyo jaamacadaha ama Ikhtiyaariyada Isdiiwaangalinta Dugsiga Sare (PSEO) iyo Kulliyadaha Dugsiyada barnaamijyada.

Su'aalaha la weydiinayo ardaygaaga:

- Maxay yihiin awoodaha aad ku dhex leedahay mawduuca maxaase caqabado ah?
- Yaad kala hadli kartaa iskuulka si aad caawimaad uga hesho ama aad wax u weydiiso?

Su'aalaha la weydiinayo macalinka ardaygaaga:

- Sidee isbeddelada qaabka waxbarashada (tusaale ahaan, shaqsi ahaan, iskudhaf, ama barashada fogaanta) saameyn ugu yeesheen barashada ardaygeyga?
- Sideen ku heli karaa warar dheeri ah oo ku saabsan horumarka ardaygayga?
- Maxay yihiin adeegyada laga helo dugsiga si ay u taageeraan ardaygayga?

Qiimeynta Gobolka waxay ku Wargelinayaan Qorshaha Waxbarashada ee Minnesota

La Soco Fulinta Heerarka

- Heerarka waxay qeexayaan rajooyinka laga qabo barashada iyo waxbarida ardayga.
- Qiimaynta gobolka oo dhan waxay bixisaa sawir kooban oo ku saabsan barashada ardayga.
- Dugsiyada dadweynaha iyo degmooyinku waxay u isticmaalaan natiijooyinkan inay yihiin qayb ka mid ah nidaamka qiimaynta dhammaystiran.
- Macluumaadka nidaamka qiimeynta degmada (fasalka, degmada, iyo qiimeynta gobolka) ayaa si wada jir ah u wada shaqeeya si loo hago barista iyo barashada heerarka.

Mudnaan sii sinnaanta

- Macluumaadka ka imanaya nidaamka qiimaynta oo dhammaystiran waxaa loo isticmaali karaa hage ahaan si loo hubiyo in arday kasta uu helo waxbarasho tayo sare leh, iyadoon loo eegin jinsiyadooda ama lambarka ZIP.
- Natiijooyinka qiimeynta gobolka waxaa loo isticmaali karaa in lagu eego guud ahaan kooxaha ardayda, iskuulada iyo degmooyinka si loo aqoonsado sinaan la'aanta salka ku heysa loona muujiyo dhaqamada waxbarasho ee rajada leh.

Keen natiijooyin ansax ah

- Macallimiinta Minnesota iyo xubnaha bulshada waxay ku lug leeyihiin tallaabooyin kala duwan oo ah horumarinta imtixaanka oo waa lamaanayaal muhiim u ah shaqadan.
- Waxaa jira baaritaan adag iyo xaqiijinta natiijooyinka kahor warbixinta.
- Labaduba waxay xaqiijinayaan in natiijooyinka qiimeynta gobolka oo dhan ay yihiin cabir sax ah oo la isku halleyn karo ee barashada heerarka waqtiga imtixaanka ardayda.

Inta lagu gudajiray sanad dugsiyeedka 2020 - 21, barayaasha, ardayda iyo qoysaska waxay la kulmeen isbadal weyn oo qoto dheer xaga barida iyo barashada, iyo waliba ladnaanta bulshada iyo shucuurta.

Waa muhiim in tan maskaxda lagu hayo marka la turjumayo natiijooyinka qiimeynta, maadaama isbadaladaan ay ka muuqdaan buundooyinka ardayda laakiin ay adagtahay in si sax ah loola xisaabtamo.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan sida iskuulkiina u sameynayo taageeridda barashada ardayda, booqo Heerarka Kasbashada Imtixaanka, Natiijooyinka Imtixaanka iyo bogga Ka-qaybgalka ee Kaarka Warbixinta ee Minnesota.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan natiijooyinka MCA ee ardaygaaga, la xiriir dugsigaaga. Haddii aad su'aalo ka qabtid heerarka tacliinta ee Minnesota ama qiimeynta, la xiriir mde.testing@state.mn.us.

DEPARTMENT OF EDUCATION